



Waalidiinta mataala Fasalka(KEV)

Ururka mataala Waalidiinta Fasalku waa wakiilka Waalidiinta waxayna utaaganyihiin dalabaadka/cabashooyinka iyo rabitaanka waalidiinta. Taasina waa waxa ay uga matasho Macallimiinta,Maamulka Dugsiga iyo Gudoonka waxbarashada ee Fiyeenna.

Doorashada wakiillada waalidiinta fasalka waxay ka dhacdaa kulanka Fasalka (kulan habeeneedka Waalidiinta). Waalidiinta Fasalku waxay Sannadkiiba doortaan wakiilka waalidiinta Fasalka iyo kuxigeenkiisa.

Labadaas wakiil ee waalidiinta fasalku waxay ku shaqaynayaan si iskaa wax u qabso ah ,taas oo macnaheedu yahay in aan wax dhaqaale ahi kasoo gelayn shaqadooda. Waxayna leeyihiin hawlo iyo xuquuq sharciyeysan, taasoo ku taagan shuruuc ugaar ah ayna tahay in ay ku dhaqmaan.

Maamulka dugsigu waa in ay gaadhsiiyaan kalana hadlaan Wakiillada waalidiinta fasalka waxkasta oo waalidiinta iyo ardaydaba muhiim u ah,waxayna kaloo awoodi karaan in ay aragtidooda“fikradahooda” soo jeediyaan. Macallimiinta waxay ka caawinayaan in ay warbixinada uga gudbiyaan Waalidiinta.

wakiillada Waalidiinta Fasalku waxay kumatalaan Waalidiinta Fasalkooda kulan Dugsiyeedka, waxayna uga soo warbixiyaan Waalidiinta Fasalka,wixii kulankaas looga hadlay amaba lagu go'aansaday.

kulan dugsiyeedka waxaa looga doodaa looguna codeeyaa wax kasta oo ay qaybaha Dugsigu sida Macalimiinta iyo Waalidiintu go'aamin karaan. – Tusaale. „Maalinta Dugsiga, xafladda Dugsiga,Asbuuca mashruucyada, Maalinta lahadalka Waalidka, isticmaalka dhaqaalaha iyo waxa lagu bixinayo(Adeega).

Naadiga/isutegga ee Magaalada Fiyeenna waxay kacaawiyaan Matalayaasha Waalidiinta Fasalka Shaqooyinkooda. Marka hadii Aad Su'aalo qabtid amaba Aad wax tabanaysid, la soo xidhiidh naadiga waalidiinta Fiyeenna (LEVW). waxaad ka qaybqaadan kartaa Aqoon kororsiga iyo siminaarada uu naadigu u sameeyo Ururka wakiillada waalidiinta Fasallada.

LandesElternVerbandWien-LEVW

Büro: 1010 Wien, Rauhensteingasse 5/ 4. Stock, Top 45

Tel: 0677/ 621 674 46

www.elternverband-wien.at

